
JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOMAALIYA

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA

# JUQRAAFI
## FASALKA AFRAAD



F.A.

# JUQRAAFI

## FASALKA AFRAAD

## 4

JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMAALIDA
WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA

Buuggaan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo
aan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin oggolaansho

Waxa lagu daabacay Madbacadda Qaranka
Xamar — 1975

# TUSMO

| | |
|---|---|
| Ururiska Heerkulsid iyo isticmaalka Heerkulbeeg | 1 |
| Dabaysha | 4 |
| Roob beegga | 7 |
| Cimilo | 9 |
| Degaanka | 15 |
| Dalka Soomaalida | 29 |
| Qaabka iyo Samayska dhulka | 31 |
| Hantida Biyaha | 39 |
| Labada Webi | 40 |
| Badaha waaweyn | 42 |
| Badda iyo Kalluunka | 44 |
| Ganacsiga | 49 |
| Shaqooyinka dadweynuhu qabto | 52 |

## H O R DH A C

Buuggan waxa loogu tala galay Fasalka Afraad ee dugsiyada Baraymariga ah.

Ardayda buuggan loogu tala galay muddo ayey haatan Af Soomaali wax ku soo baranayeen, sidaa darteed waxa aanu ku rajo weynahay in aanay dhibaato kala kulmi doonin.

Buuggu mawaadiicda uu ka hadlaayo waxa ka mid ah Cimilo, Qaabka Samayska dalka hooyo, Webiyaasha (Jubba iyo Shabeele) degaanka, sida loo maamulo ganacsiga dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba, Badaha waaweyn iyo Kalluunka.

Xafiiska Manaahijku wuxu mahad u naqayaa qorayaasha buuggan oo ah: Maxamed Xaaji Xasan Geelle (Bashiir), Muuse Faarax Xayd, Jaamac Cabdillaahi Shuuriye, iyo dadkii hawshaas gacan ku siiyey oo dhan, gaar ahaan Jawaahir Cabdalle Xaaji Faarax oo buugga habayntiisa iyo naqtiinkiisa qayb weyn ka qaadatay.

Waxa kale oo Xafiisku u mahad naqayaa Idiriis Maxamuud Cabdillaahi iyo Muxsin Taabit oo kharidadaha iyo sawirrada u sameeyey iyo garaacayaashii buuggan.

Maamulaha Xafiiska Manaahijta
**Bashir Faarax Kaahiye**

## URUURISKA HEERKULSID IYO ISTICMAALKA HEERKULBEEG

Heerkulsidku waa heerka kulka, waxaana lngu qiyaasaa qalabka la yidhaahdo heer kulbeeg. Badanaaba heer kulbeegga waxaa ku hoos jira meerkuri. Markay meerkuridu kululaato way fiddaa oo kor bay u kacdaa. Markay qabowdana way ururta oo hoos bay u dhacdaa. Sidaa daraadeed dhererka meerkurida baa tilmaama hadba inta heer kulsidku yahay.

Heerkulbeega waxa lagu doortaa hadba inta le'eg yahay, sida uu wax u tilmaamayo iyo sida qaladka looga ilaalinayo.


### SIDA LOO SAMEEYO HEERKULBEEG

1. Waxaad gelisaa heer kulbeeg biyo diiran. Maxaa dhacay?
2. Mar labaad waxaad gelisaa biyo qabow. Imminkana maxaa dhacay?
3. Waxaad doontaa heer kulsidka hawada fasalka aad ku jirto.
4. Waxaad doontaa heer kulsidka kilkiladaada.
5. Waxaad doontaa heer kulsidyo kale oo dhowr ah, keebaa ugu kululaa? Keebaa ugu qabowba?
6. Waxaad isku dartaa laba biyayow oo is le'eg oo midna kuleyl yahay midka kalana qabow yahay. Waa maxay heer kulsidku? Waxaad isku dartaa laba koob oo biyo kulul ah iyo mid biyo qabow ah. Muxuu noqday heerka kulsidkii?

**QALABKA:** Dhuun qurraarad ah — waa in uu leeyahay fur rabar ah — iyo quraarad khad ah. Ka buuxi biyo midab leh quraarad (waxaa wanaagsan alkahol midab leh). Dhuuntaa waxaad gelisaa furka qurraarada, furka rabarka ahna hoos u riix ilaa uu gaadho biyaha. Heerkulbeeg geli biyo qabow. Maxaa dhacay dabeetana? Mar labaad geli biyo diiran, imminkana maxaa dhacay?

Waxaa jirta in wixii alaab maatar ahi ay fidaan marka la diiriyo, marka la qabowjiyana ay ururaan. Sida daraadeed biyihii qurraarada ku jiray way fideen markii la kuleyliyey, waana yaraadeen markii la qagowjiyey.


**QALAB: HEERKULBEEG, QURRAARAD BIYO MIDAB LEHI KU JIRAAN, FUR RABAR AH**




## SIDA TIRADA LOOGU SAMEEYO HEERKULBEEGGA

Haddaad donaysid in aad tiro ku dhigto heerkulbeeg waa in aad yeeshaa sida soo socota:


Waxaad soo qaadataa heer kulbeega la yidhaahdo Sentigirod. Waxaad gelisaa heerkubeega baraf. Meesha u hooseysa (alkahoosha ama meerkurida), ay hoos u dhaafiweydo waxaad ku dhigta tiradda eber digrii (0°). Mar labaad waxaad ku riddaa biyo karaya. Imminkana meesha u sarreysa ee biyaha, (alkahosha ama meerguridda) dhaafi-weydo waxaad ku dhigtaa tiradda boqol digrii (100°). Marka dabadeed waxaad u qaybisaa boqol meelood oo is le'eg inta u dhaxaysa tirada eber digrii (0°) iyo boqol digrii (100°).



**Qalab lagu garto geesta dabayshu ka soo dhacayso.**

Waraaq jaafi ah oo kuwa kartuushyada saabuunta lagu keeno oo kale ah soo qaado. Laba gobol oo sida musawirka aad ku aragto u eg ka gooso warqadda.

Qori dhuuban oo dhererkiisu 30 sm yahay soo qaado labadiisa af kala dillaaci, dillaaca dhererkiisu ha ahaado $2^1/_2$ sm. Labadii gobol ee waraaqda ahaa geli qoriga labadiisa af. Qorigii far keliya dul saar oo eeg halka uu ka dheelitirmo. Qori dhumuc leh oo dhererkiisu yahay 40 sm soo qaado. Halkii uu ka dheelitirmay, qoriga madaxiisa ku musbaar. Labada qori halka ay iska haystaan dhoobo saar. Qoriga sare warwareeji, ilaa uu si hawl yar u wareegi karo. Qalabkan markaad dhistid, ku xidh meel dabayshu ka dhacayso, sida deyrka aqalka ama dugsiga. Bal jitaabi inuu shaqaynaayo iyo in kale. Afuuf xaggee buu afkeedii u jeestay? Xaggaad ka afuufaysay. Sida oo kale ayuu dhinaca dabayshu ka soo dhacayso ugu jeestaa.



Hoos waxa ku yaal jitaabooyin iyo waaya-aragnimo dad hore heleen, taas oo ah sida xawaaraha dabaysha loo cabiro adoon haysan qalabkii, oo gargaarsanaaya waxyaalaha hareerahaaga yaala.




| Fiirsasho | Saacadiiba intaa oo mayl | Magaca dabaysha |
|---|---|---|
| 1) Haddii qiiqu sare u baxo | iyo wixii | kaad |
| 2) Marka caleemaha dhirtu dhaq-dhaqaaqaan | ka yar 4-7 | Neecaw |
| 3) Marka calanku qumaati u kala baxo, ee uu istaago | 8-12 | laydh |
| 4) Marka xaashiyaha dabayshu baalbaasho | 13-18 | |
| 5) Dhirta yaryar ruxmanto | 19-24 | |
| 6) Lamaha dhirta waaweyni ruxmaan | 25-31 | |
| /) Geedka oo dahmmi wada ruxmo | 32-38 | |
| 8) Lamaha yaryari ee dhirtu jajabaan, ay adkaato inaad ka hortegid | 39-54 | |
| 9) Daarahu dildilaacan | 47-54 | |
| 19) Dhirta jiridaha u bixiso daarahana dhibaato weyn gaadhsiiso | 55-63 | |

Todobaad labada gelinba fiiri xagga dabayshu ka soo dhacayso, oo ciribta aad heshid tusahan geli:

| Maalmaha | Gelin hore | Gelin dambe |
|---|---|---|
| Sabti | | |
| Axad | | |
| Isniin | | |
| Talaada | | |
| Arbaca | | |
| Khamiis | | |

**Cabiraadda Xawaaraha dabaysha:**

Laba ulood oo dhuudhuuban, dherekooduna yahay 50 sm soo qaado. Is dul saar oo muuqoodu ha u ekaado sida xarafka «X». Dhexda iskaga musbaar. Laba kubbadood oo yaryar soo qaad. Mid walba laba isle'eg u kala gooy. Afarta gobol midkood rinji oogaada ka mari. Afartii gobol ku musbaar ulaha afafkooda, xagna u wadajeedi. Qori dhererkiisu yahay 50 sm isku talaabta ku musbaar, sida aad muuqa ku aragtid ha u ekaado qalabkaagu:




Gacantaada cabaar ku wareeji qalabka intiisa sare, si ay u jilicdo. Halka musbaarka iyo qoriga taageerka ahi iska haystaan waxoogaa dhooba ah ku dheji. Tallaabooyinkan marka aad dhamaysid ee qalabkan dhistid, meel dibedda ah oo dabayl leh ku xidh. Maxa dhacay? dabayshii way wareejisay isku talaabtii. Haddii dabayshu xawaaraheedu weyn yahay, aad baa qalabkanu u wareegi, haddii kalena tartiib-tartiib. Markaa dabaysha wareegiisa baa laga gartaa, xawaaraha hawada qalabkaa lagu cabiro waxaa lagu magacaabaa (Anoomitar). Si aad u heshid xawaaraha hawada, tiri inta wareeg ee gobolka aad ranjiday uu sameeyo muudo 30 seken ah. Tirada aad heshid shan (5) u qaybi. Tirada ka soo baxda qaybta waxa weeye inta mayl ee saacadiiba dabayshu jarayso, ama xawaaraheeda.



## MEESHA HABBOON IN LA DHIGO ROOB BEEGGA

Waa in la dhigaa meel bannaan ah si aan biyaha daaraha iyo kuwa dhirta midna ugu shubin masafka roob beegga. Waa in ugu yaraan soddon sentimitar hoos la geliyo dhulka si aan biyaha hareeraha ka maraya u qulubaa gadiyin roob beegga Isla markaa si aan qoraxdu biyaha ku jira jaarka ugu bedellin uumi. Waxaa la filaayaa biyaha ku shubma roob beega in biyo le'eg ay ku da'ayn dhulka u dhow meesha uu roob beeggu ku jiro.

## SAWIRKA ROOB QIYAASE TIRO LEH



Meelaha **Cimilada** lagaga shaqeeyo waxay leeyihiin qalabka roobka lagu qiyaaso ee la yiraahdo roob beeg.

Roobka ku da'a masafka wuxuu ku diniina jaarka hoos yaal. Afar iyo labaatan saacadood ka dib ayaa biyaha waxaa lagu shubaa dulolubo jeexjeex tiro leh. Halkaas baa laga akhriyaa inta ay biyuhu le'eg yihiin. Biyaha waxaa lagu qiyaasa tirada hiish ama milimiter.

## L A Y L I:

1) Waa maxay heerkulsidku?

2) Maxaa ku hoos jira heerkulgeegga?

3) Maxaa lagu doorta heerkulbeegga?

4) Maxay dherarka meerkuridu tilmaantaa?

5) Sidee loo sameeya heerkulbeegga?

6) Sidee tiradda loogu sameeya heerkulbeegga?

7) Sidee tiradda loogu sameeya Kulbeegga?

8) Maxay leeyihiin meelaha lagaga shaqeeyo cimiladu?

9) Sawir roob beeg tiro leh?

10) Sowir alaabta uu ka sameesan yahay keerkulbeegu iyo heerkulbeeg santigireed ah.



## C I M I L O

Cilmilada waxa sameeya oo ay ka kooban tahay heer kulsidka, roobka, dabaysha, cadaadiska hawada iyo qoyaanka hawada, roobka.

Sidaas darteed kolka la rabo in laga hadlo cimilo (ta joogtada ah ee waqtigeedu gaaban yahay iyo tan waqtigeedu dheer yahayba) waxa loo baahan yahay in waxyaabahaasi cimiladu ka kooban tahay midba gooni loo faalleeyo. Waxa kale oo cimilada raad ku leh meesha laga hadlaayaa halka ay dunidda kaga taal iyo jooga ay badda ka horreysaa inta uu yahay.

**Roobka iyo Dabaysha:** Dalka Soomaalida waxa lagu tiriyaa kuwa aan roob badan helin. Guud ahaan dalku sannadii laba xilli buu roob helaa, kuwaas oo ah waqtiyada ay dhacaan dabaylaha loo yaqaan «Mansuun». Bilaha Abril-Sebtambar waxa ka dhacda dabayl loo yaqaan «Mansuunka koofurgalbeede» taas oo Abril-Juun roob fiican keenta. Xilliga dabayshaasu dhacdo waa ka ugu roob badan xilliyada waxana loo yaqaan Gu. Dabayshaas mansuun-Koonfur-galbeed oo soo dul marta

Badweynta Hindiya, roob fiican oo loo yaqaan xagaayo bay keentaa gobolada Koonfureed bilaha Julaay, Ogost, iyo Sebtember. Hase yeeshee, kolkay dabayshaasu waqooyiga dalka gaarto biyihii ay xambaarsanayd oo dhan way sii deysay oo way qalalan tahay xoogna way leedahay.

Xilliga kale ee dalku roob helaa waa ka loo yaqaan dayr lana socda dabaysha mansuun-waqooyi-bari. Mansuun waqooyi-bari waxay dhacda bilaha Oktoobar-Abril waxanay ka timaadaa lamadegaanka Carabta, inkasta oo ay soo jiidho Badweynta Hindiya iyo Badda Cas. Sidaas darteed badanaaba, roobka dayrtu dalka oo dhan wuu ka yar yahay kan guga buuraha Golis oo iyagu dabayshaas roob fiican ka hela mooyee.

Labadaas xilli ee roobku da'o mid walba waxa ka hormara waqti gaaban (ugu badnaan bil) oo neecawdu jihadeeda gelin gelin u bedesho kulsidkuna sare u kaco. Waqtigaas isaga ah waxa loo yaqaan kaliil, wuxuuna muddo yar ka dmabeeyaa labada goor ee qoraxdu ku toosto dhulbadhaha korkiisa (maarso

iyo Sebtembar). Waxa kale oo xilliyadaas roobka ka dambeeya laba xilli oo abaar ah. Xilliyadaas mid waxa la yiraahdaa xagaa (Juun-Ogost) waana kolka dabaysha mansuun-Koonfurgalbeed ugu xoog weyn tahay uguna bus badan tahay, heer kulsidkuna ugu sareeyo dalka badankiisa xeebaha koofureed mooyee. Xilliga kale waxa la yiraahdaa Jiilaal (Diisamber-Febraayo), waana kolka ay dabaysha mansuun-waqooyi-bari dhacayso. Dabayshaasu waxanay leedahay dhaxan loo yaqaan dayradhaaf.

Inkasta oo labada xilli ee guga iyo dayrtu ay yihiin xilliya-







da roobka, xagaaga roob fiican baa hela xeebaha Koonfureed iyo dooxooyinka hoose ee webiyadu maraan.

Buuraha Golis iyo xeebaha waqooyi galbeed laftooda xilligaas waxa ka da' roob xays loo yaqaan oo wax weyn tara dadka iyo duunyada meelahaas dega.


Heerkulsidka: Guud ahaan dalka Soomaalidu wuu kulul yahay kulsidkiisuna sannadka oo dhan wuu koreeyaa buuraha Golis maahee kulaylkaas sannadka oo dhan jiraa wax ugu wacan (b) Dalka oo badiba joogga uu badda ka horeeyaa uu hooseeyo; (t) iyada oo uu cirku qaawan yahay oo aanu daruur badan lahayn; (j) iyada oo uu ku yaal kulaalayaasha dhexdooda, dhulbadhuhu uu ka gudbo; (x) iyada oo dabaylaha ka dhacaa ay dalka gudihiisa gaaraan iyagga oo engegan, wixii ay biyo xambaar-sanaayeenna ku reebay dhulka xeebaha ah.

Sidaa darteed, meelo bartamaha dalka ka mid ah sida Luuq, kulsidkoodu kolkol wuxuu gaaraa kan adduunka oo dhan ugu koreeya (45°C). Kolka dabaysha mansuun-Koonfur-galbeed ay dhacayso bilaha Abril-Sebtambar, kulsidka xeebaha koonfureed iyo dooxooyinka hoose ee webiyadu, hoos buu u dhacaa oo (30°S). Kor uma dhaafo, waayo xilligaas roob baa da'a cirkuna daruur buu yeeshaa. Isla bilahaas laftooda bartamaha dalka iyo xeebaha waqooyi aad bay u kululaadaan oo Berbera kusidku wuxuu gaaraa (43°S), waayo dabayshu waxay halkaas gaartaa iyada oo kulul oo engegan. Bilaha Diisembar-Maarso oo ah xilliga ay dabaysha maansuun-woqooyi-bari dhacayso, kulsidka xeebaha waqooyi iyo buuraha Golis hoos buu u dhacaa oo (30°S) ma gaaro, hase yeeshee xeebaha koonfureed iyo dooxooyinka webiyadu waa xilliga ay ugu kulul yihiin.

Sidaas darteed, waxa muuqda roobka iyo kulsidka Soomaaliya waxa ugu weyn ee isbedel ku sameeyaa inay yihiin dabaylaha mansuunka, inkasta oo jooga dhulku badda ka koreeyo iyo meesha dalku dunidda kaga yaal, ay iyana qayb weyn qaataan.


Kulsidka Dolka Dusambar - Abril
20°C
15°C
10°C
5°C
0°C
Shabeelle
W. Jubba
xariq waliba waxay xiriirinaysaa
meelaha Kulsidkoodu isleeg yahay




Kharidad Muujinaysa Roobka
150 - 200 mm.
100 - 150 mm.
50 - 100 mm.
0 - 50 mm.
Dabaylaha mansuunka

## L A Y L I:

1) Cimiladu maxay ka kooban tahay?

2) (b) Magacaw xilliyada Soomaaliya roobka hesho iyo bilahooda.

(t) Magacaw xilliyada abaarta iyo bilahooda.

3) Soomaaliya waxa lagu tiriyaa dalalka sannada oo dhan kulul. Waayo? sheeg afar sababood.

4) Kolka xeebaha koonfureed rooban yihiin, xeebaha waqooyi waa abaar. Waayo?

5) (b) Buuraha Golis way ka qabow yihiin dalka intiisa kale. Waayo?

(t) Magacaw dabaylaha cimilada beddela ee dalka ka dhaca.



## D E G A A N K A

Inta aynaan dhex gelin casharkeenna, bal horta aan isla meel dhigno degaanku wuxuu yahay? Degaanka dadka bani'aadamka ah ee imminka adduunyada ku dhaqani waxa uu u qaybsamaa laba meelood. Labada meelood, meeli waa qalabka aan dabiiciga ahayn ee ay dadku soo saareen intay adduunyada ku dhaqanayeen. Meesha labaadna waxa weeye waxyaabaha dabiiciga ah ee ay dadku adduunyada ugu yimaadeen iyagoo sidooda ah.

Haddaba casharkeennaa waxa aynu kaga hadlaynaa degaanka dabiiciga ah. Waxyaalaha aynu wax ka taatabanaynana waxa ka mid ah dhirta, daaqa, ciidda, hawada, iyo wixii la mid ah.

Marka aynu u fiirsano waxyaabaha aynu kor ku soo sheegnay waxa aynu rumaysanaynaa in waxyaabahaasu yihiin waxyaabo aanu dadku noloshooda caadiga ah uga maarmi karin iyo waxyaabo aanay la'aantood marnaba dadka u suurtobeen inay nolosha iyo ilbaxnimada ka gaadhaan heerka ay maanta ka joogaan. Marka halkaa waxa inooga cad in aanu ninku marnaba ka maarmi karin degaanka: Intaas waxa raaca sannadba sannada ka danbeeya ayey dadka tiradoodu sii badanaysa. Markii dadka tiradiisu sii badatana baahida ay degaanka u baahan yihiin way sii kordhaysaa maxaa yeelay cuntadii iyo qalabkii ay dadku degaanka uga baahnayeen ayaa sii kordhaaya.

Iyada oo baahida loo qabo heerkaas gaadhsiisan tahay, ayaa hadana dadku maalin kasta iyo saacad kasta ku samaynayaan degaanka waxyaalo halis ah oo aad u fool xun iyo dhibaatooyin waaweyn oo laga baqayo inay si dhaqso ah uga dhigaan degaanka dabiiciga ah mid dad iyo xoolo toona aanay ku noolaan karin.

Sababaha ay dadku dhibaatooyinkaas ugu geystaan degaanka waxa ka mid ah dadku had iyo jeer waxay isku dayaan inay dhibaatooyinka markaas ku taagan ee culayskaa ku haya wax ka qabtaan. Marka waxa dhaca in dadku ogaan iyo ulakac u dhibaateeyaan degaanka si ay dhibaatooyinkooda wax

uga qabtaan. Tan labaad dhibaatooyinka degaanka loo geysto aramidoodu markaaba ma soo baxdo ee muddo ayey qaadata, waxana laga yaabaa in dadku iyagoon ulajeedin, garasha la'aan wax u yeelaan degaanka oo marka muddo dabadeed aqoonsadaan khaladka ay sameeyeen.

Dhibaatooyinka waaweyn ee uu dadku degaanka u geysto waxa ka mid ah in imminka waddamada qaarkood hawadoodi aad u xumaatay. Xumanshahaa hawadana waxa keenay warshadaha iyo mashiinada cusub. Khatarta weyn ee ka timid xagga hawada waa mid maanta dadka adduun weynaha ku nool welwel weyn ku haysa waxana wadnaha farta lagaga hayaa in haddii aan arrintaa dhaqso wax looga qaban aakhirka dadku hawo ay ku noolaadaan waayaan.

Arrintaa hawadu waxay imminka werwer weyn ku haysaa dadka ku nool waddamada hore u maray ee uu dadkoodu aad ugu adeegto mishiinada kala geddisan. Waqtigan imminka ah dhibaatada ku saabsan hawadu dhibaato weyn kuma hayso Soomaaliya iyo waddamada la mid ka ah ee soo koraaya. In kastoo taasu jirto dhibaatada hawada, oo xumaata ma aha arrin waddano gaar ah lagu eegi karo ee waa dhibaato dadka adduunweynaha ku dhaqan oo dhan xil ka saaran yahay . Sidaa darteed, waa lagama maarmaan in dadweynaha adduunyada ku dhaqan oo dhammi ay dhibaatadaa u guntadaan, si waddanada ay imminka cidhiidhiga ku haysana loo gargaaro kuwa kalena looga caawiyo siday uga gaashaman lahayeen. Dadku dhibaatooyinka ay degaanka ku hayaan hawadu un kuwa koobna ee waxay dhibaatooyin taas aynu soo sheegnay la mid ah ku hayaan, dhirta, daaqa, biyaha, ugaadha, ciidda, cayayaanka, iwm.

## D H I R T A

Dhirtu waxay ka mid tahay waxyaabaha degaanka ka midka ah ee aanay dadku noloshooda uga maarmi karin hadana ay sida xun u isticmaalaan. Baahida uu dadku dhirta u baahan yahay ma aha mid dhowaan bilaabantay ee waa mid weligeedba jirtay. Dhirtu sida aynu ogsoon nahay meel kasta kama baxdo ee meelaha roobabku ku badan yihiin ayey ka baxdaa. Dadkuna sida uu imminkaba u jecel yahay ayuu weligiiba u jeclaa inuu ku noolaado meel robabku ku badan yihiin. Taasu waxay ina tusinaysaa in xidhiidhka ka dhexeeya dadka iyo dhirta uu yahay mid ab soo jireen ah. Waxa kale oo taa ina tusinaya dadku intaanu ilbaxnimada samaysan ee aanu baran sida beeraha loo fasho iyo sida xoolaha loo dhaqdo, waxu ku noolaan jiray dhirta dhexdeeda. Waagaana dhirtu ninka iyadaa wax kasta u ahayd, hadday noqoto hooy, cunto, iwm. Waqtigan aynu imminka joognana dhirtu faa'iidooyinka ay ninka u leedahay waxay ka badan yihiin wax aynu tiro ku koobi karno, waxna ka imd ah aqalada ay ka dhistaan, doonyo iyo maraakiibta oo meelo ka mid ah laga sameeyo, weelka oo laga qoro, xaabo ahaan oo loo isticmaalo, waraaqda oo laga sameeyo,, dharka nooc raayanka la yiraahdo oo laga sameeyo, iwm. Iyada oo dhirtu faa'iidooyinka aan soo aragnay oo dhan iyo qaar kale oo badan oo aynaan halkan ku koobi karin ay leedahay ayaa hadana guud ahaan marka aynu eegno dhirta adduunka waqtiba waqtiga ka danbeeya ay soo yaraanaysey, siiba dhnrta Soomaaliya.


Haddii waddankeena aad u fiirsatid waxaad arkaysaa meelo badan oo waayadii hore dhir lahaan jiray imminkase bannaan isugu baxay. Mushkilada ay dhirtu waddanka ka sii yaraanaysaa waxay aad uga muuqataa gobollada waqooyi galbeed, Waqooyi Bari, Sanaag, Boosaaso, Garoowe iyo Mudug.

Dhibaatada haysata dhirta waddanka hadaan si dhaqso ah looga hor tegin waxa hubbaal ah in waa dhow dhirtu dhammaanayso. Dhammaadka dhirta dhibaatooyin badan ayaa daba socda waxna ka mid ah: dhulka oo inta ciidda fiicani ee ay wax ka bixi karayaan ay ka dhammaato dabadeedna nabaad guura. Sababtuna waxa weeye dhirtu biyaha iyo dabaysha ayey u diidaa inay ciidda qaadaan marka markii geed la jaraba biyihii iyo dabayshii fursad ay ciidda ku qaadaan ayey helaan.

Ta kale, dhirtu waxay yaraysaa fatahanka webiyaasha iyo meelaha kale ee biyo mareenka ah marka, hadday dhirtu yraato fatahanka webiyaashuna way bataan oo khasaarooyin aan laga kaaban kareyn ayey u geystaan nafaha dadka iyo dhaqaalaha

dalkaba. Waxa kale oo jirta in meesha ay dhirtu ku yaraato robabkuna ku yaraadaan.

Si dhibaha iyo dhirta dhammaadkeedaba looga hortago






waxa habboon bal in horta marka ugu horaysa laysku dayo in laga dhaadhiciyo dadka reer baadiyaha ah ee had iyo jeer dhirta ku dhex nool, hagardaamooyinka waaweynna ku haya, dhirtu qiimaha ay leedahay iyo khasaarooyinka dadka iyo dalkaba uga iman kara dhaqaala darrada dhirta.



Dhirta dhaqaalaheedu ma aha arrin ay dawladda oo qudhi wax ka qaban karto ee waa mid loo baahan yahay in dawladda iyo dadweynaha Soomaaliyeed, khusuusan dadka reer miyiga ihi, ay ka qayb galaan, sidaas darteed, waxaa lagama maarmaan ah in dadka reer baadiyaha ah laga dhaadhiciyo mashruuca dhirta dhaqaalaheeda wax lagaga qabanayaa qiimaha uu leeyahay si ay arrinta wax ka qabashadeeda gacan weyn uga geystaan.

Ta kale si kasta oo dhirta loo ilaaliyo, kolley dhirta qaar ayaa loo goynayaa si loogu isticmaalo hawlo aan looga maarmi karin, sidaa darteed, waa in lagu tirtirsiyo dadka inay beeraan dhirta ay gooyayaan in le'eg. Taas waxyaabaha lagu suurto gelinayo waxa ka mid ah iyaadoo la xoojiyo lana weyneeyo maalinta la yiraahdo maalinta dhirta (waa 17-ka bisha Abriil); laguna dhiirriyo dadweynaha Soomaaliyeed meel ay joogaanba inay maalintaas hawsheeda si fiican oo niyad ah uga qeyb qaataan.

Dadka dhirta dhibaatooyinka ugu waaweyn ku haya waxa weeye dadka xoolo raacatada ah iyo dhuxulaysatada. Markaa waxa habboon in labada qoloba lagula taliyo in aanay dhirta da'doodu yar tahay gubin, goynna. Ta kale in hadday u baahdaan inay dhirta jaraan aanay gunta ka jarin ee laamaha hareeraha ka goostaan. Dhuxulaystaduna in aanay gubin dhirta qoyan ee ay gubaan dhirta qallalan.

Waxa kale oo iyana habboon in ardayda Soomaaliyeed heer kasta tacliintoodu ha jootee loogu dhigo dugsiyada casharro ku saabsan degaanka dhowristiisa isla markaana aanay ardaydu la aamusnaan waxyaabaha ay barteen ee ay dadweynaha Soomaaliyeed ka dhaadhiciyaan dhibaatooyinka uga iman kara dhaqaale la'aanta degaanka.

## DHAQAALAHA CIIDDA

Heerka maanta dadku ilbaxnimada ka gaadhsiisan yihiin ma aha mid uu dadku kartidooda oo qudha ku keeneen. Waxa jira waxyaabo badan oo dabiiciya oo aan la'aantood ilbaxni-

mada dadku heerka y imminka joogto iyo mid u dhow toona aanay gaadheen. Waxyaabahaasna waxa ka mid ah ciid, biyo macdanta, iwm.

Sida dad kasta dhulka ay ku nool yihiin u samaysan yahay ay qayb weyn uga ciyaarto noloshoodu caynka ay tahay, ayaa sida ciidda dhulkoodu tahayna ay qayb weyn uga ciyaartaa noloshooda, maxaa yeelay dadku waxyaabaha uu u baahan yahay intooda badan ciida ayuu kala soo baxaa. Waxa ka mid ah wax yaabaha lagama maarmaanka ah ee dadku kaal soo baxo ciidda, waxa alaaleh iyo wixii la beero iyo wax alaaleh iyo wixii macdan ah. Sidaa darteed ciidda dhaqaalaheedu waa wax aan marna la dhayalsan karin.

Inkastoo ay adduunyadu ciddo badan oo kala geddisan leedahay hadana badanaaba dhibaatooyinka ciidda gaadha saddex wax ayey uga yimaadaan: (1) Beeraha, (2) Daaqa xoolaha, (3) iyo carro guur.

Ciidda markii wax lagu beeraba beertaanku wax buu yeelaa ciidda lafteeda iyo macdanta ciidda ku jirtaba. Ta kale carro guurk iyo daaqa xoolaha muddo yar ayey ku qaadataa inay ku halleeyaan ciidda ay dabiicada samayskeedu ku qaadatay muddo dheer.

Si looga hor tago dhibaatooyinkaa waaweyn ee adduunka kaga soo fool leh xagga ciidda waxa habboon in horta dhir lagu beero dhulka buuraha ah ee togaga iyo webiyaashu ka soo bilabmaan. Waxa iyana habboon in dhir iyo doog lagu beero dhulka bannaanada ah ee carro guurku aad uga socdo.

## DAAQA DHULKA IYO DHIBAATOOYINKA KA TAAGAN :

Daaqa ka baxa dhulalka kala geddisan ee adduun weynuhu wallow magaca guud uu ka dhexeeyo oo dusha daaq layskaga yiraahdo, hadana waa kala jaad. Daaqa meel kasta ka baxaa jaadkiisuna waxu ku xidhan yahay kolba meshuu daaqu ka baxayo sida ciideeda iyo cimiladeedu tahay.



Dhulalka adduunka ugu daaqa fiican ihi, waa dhulalka aan aadna u qalalnayn aadna u roobka ahi badnayn. Meesha aynu tilmaamaynaa waxay u dhexeeyaan dhulka ay roobabka badani helaan ee ay ka baxaan keymaha jiqda ahi, iyo lama degaannada adduunka.


Dhulalka daaqa leh ee ku dhow ayda jiqda ihi, wallow roobabkay helaan ay ka yar yihiin kay helaan dhulalka ay jaarka yihiin, hadana iyaga qudhoodu robab fiican bay helaan sidaa darteedna daaqa ka baxaa wuu ka badan yahay kana dheer yahay ka ka baxa meelaha la jaarka ah lama degaanka.

Dhirtu siday xajmiga uga weyn tahay daaqa ayey biyaha ay u baahan tahayna uga badan yihiin kuwa daaqu u baahan yahay. Sidaas darteed daaqu wuxuu ka bixi karaa meelo aanay dhirtu ka bixi karin. In kasta oo ay taasu jirto hadana daaqu sida dhirta kama bixi karo meelaha ay biyuhu dhusinka hoose aad ugu arorsan yihiin amase ay ka durugsan yihiin. Dhirtuse waxa suurtogal uga dhigay in ay meelahaas oo kale ka baxdo xididadeeda dhaadheer ee meel dhow iyo meel dheerba biyo uga soo qaadaya.

Dhulka Soomaaliya waxa u badan yahay dhulal daaq fiican leh. Sidaa awgeed, dadka Soomaaliyeed boqolkiiba sideetan ayaa ah dad reer guuraa ah oo ay noloshooda iyo dhaqaalahooduba xoolo ku xidhan yihiin. Xooluhu sida aynu ogsoon nahay waxay u baahan yihiin daaq fiican si looga helo caano iyo cad fiican. Waxase nasiib darro ah haddii aad u fiirsatid daaqa dalka in aad ogaanaysid in sannadba sannada ka danbeeya wax ka sii dhacayaan haddii iin arintaas wax laga qaban ay sidaa ku sii socotona waxay aakhirka ku danbaynaysa in dalku isugu baxo dhul lama degaan ah oo aan dad iyo xoolotoona ku noolaan karin.

Marka waxa ruux kasta oo Soomaali ah ku waajib ah sida maahmaahda Soomaaliga ihiba sheegayso «Belaayo ka hor tag bay leedahee ka daba tag ma leh» in aanu mushkilada indhaha ka qarsan ee waxu ka qaban karayo uu imminka ka qabto. Wax ka qabashadaasuna haw qaybsaaato laba siyood: Tan hore oo ah sida wax looga qabanayo inuu daaqa dhulku hoos u dhaco. Ta labaadna waa sidii daaqii kor loogu soo qaadi lahaa ee heerkiisii hore loogu soo celin lahaa.

Waxyaabaha daaqa waxyeeleya waxa ka mid ah, dhulka oo meel kasta xoolaha deggani aanay u qiyaasnayn ee ay xooluhu meel isugu tagaan. Taasu badanaba waxay ka dhacdaa dhu-






lalka roobabku helaan iyo meelaha biyaha leh ee xooluhu u soo ceel degaan jiilaalka. Marka ay xooluhu dhulkaas isugu soo uruuraan, oo ay daaqii ilaa gunta cunnaan, waxa suurtowda in aan meesha doogba kasoo bixin ama doog kii hore ka liitaa uu ka soo baxo.

Waayadii hore dhulku waxu u qaybsanaa dhul oomane ah oo dadka iyo xooluhu gugii mooyiye aanay jiilaalkii ku noolaan karin; iyo dhul biyo leh oo ay dadka iyo xooluhuba jiilaal-Taa faa'iidadeedu waxay ahayd dhulka ayaa kolba inikii markay ka soo guraan dhulka oomanaha ah dul deggaan. nasan jirtay oo daaqeeduna waqti uu si fiican u baxo heli jiray. Imminkase dhulkii sidii talantaaliga ah loo degi jirey ma jiro maxaa yeelay dhulkii oomanaha ahaa ayaa inta berkado laga sameeyey dad rigii u degan yihiin. Taasuna waxay dhalisay in xoolihii daaqii oo yar oo aan weli korin cunaan. Sidaas darteed aan dhulalka qaarkood daaqba ka soo bixin.

Dadka qudhoodu dhibaatooyin badan ayey daaqa ku hayaan waxana ka mid ah iyaga oo guba amaba intay gooyaan magaalooyinka u iib geeya. Marka biyaha iyo dabaysha ayaa meeshii daaqa laga gooyey ama laga gubay intay ciidda fiican ka qaadaan nabaad guuraya.

Talaabada ugu horaysa ee wax lagaga qabanayo dhibaatooyinka haysta daaqa, waa in horta bal laysku dayo in dadweynaha mushkiladan lagu soo jeediyo oo la tuso in dalkii iyo daaqii bukaan oo ay u baahan yihiin in ladaaweeyo. Waxa taa raaca in dhulka daaqii iyo dhirtii hore ka dhammaatay lagu beero dhir iyo daaq cusub oo kala dagaalama carro guurka.

Dadka Soomaalida ah ee xoolo raacatada ihi sida aynu ognsoon nahay tacliin fiican ma leh, markaa waxa habboon dhulalka y dhibaatooyinka daaqu aad uga taagan yihiin in la geeyo dad loo soo carbiyey siday dhibaatooyinka uga hortegi lahaayeen. Waa in dadkaasu dhanna ay kala dagaalamaan dhibaatooyinka dalka ka haysta daaqa, dhanna ay dadka reer guraaga ah kala taliyaan kuna tababaraan siyaabaha daaqiisa loo dhowri karayo.

**L a y li:**

**I: Goobaabin geli xarafka ku ag yaal hadalka saxa ah:**

**Tusaale:**

Soomaaliya:

(b) Waa dal Aasiya ku yaal;

(t) Waa dal Ameerika ku yaal;

(j) Waa dal Afrika ku yaal;

(x) Dalalka aynu soo sheegnay oo dhan wuu ku yaal.

1) Degaanku labadda qaybood uu u qaybsamaa, mid waa

(b) Waxa nool ee adduunyada ku dhaqan oo dhan, ta kalena waa waxa aan nolayn.

(t) badaha adduunyada oo dhan, ta kalena waa baadka adduunyada ka baxa oo dhan.

(j) waxyaabaha dabiiciga ah ee uu dadku adduunyada ugu yimi.

(x) Intaa midna ma aha.

2) Degaanka dabiiciga ah waxa ka mid ah:

(b) Baabuurta, biyaha, Xoolaha.

(t) Dhirta, daaqa, ciidda, hawada.

(j) Daaqa, dhirta, warshada, hawada.

(x) Waxyaabaha b, t, j, ku jira.

3) Markii tirada dadku sii korodhoba baahida ay degaanka u qabaan way sii:

(b) Yaraataa.

(t) Korodhaa.

(j) Mana korodho mana yaraato.

(x) b iyo t labaduba waa sax.



4) Dadku degaanka:

(b) Ogaan ayey u dhibaateeyaan.

(t) Garasho la'aan ayey u dhibaateeyaan.
teeyaan.

(j) Ogaan iyo garasho la'aan labadaba way u dhibaa-

5) Hawada waxa xumeeya

(b) Qiiqa warshadaha;

(t) Xoolaha aduunyadda ku nool;

(j) Dhirta oo habeenkii Karboon sii daysa;

(x) Dadka oo hawada wanaagsan intay qaatan ua-badeed sii daaya mid xun.

6) Baahida uu dadku dhirta u baahan yahay;

(b) Dhawaan ayey bilaabantay;

(t) Weligeedba wey jirtay;

(j) Waayo dhexe ayey bilaabantay;

(x) b iyo j ayaa sax ah.

7) Faa'iidooyinka dhirtu dadka u leedahay waxa ka mid ah:

(b) Dharka nooca raayanka la yiraahdo oo laga sameeyo;

(t) Xaabo oo laga dhigto;

(x) Waxa kor ku yaal oo dhammi waa wada sax.

8) Gobollada Soomaaliya ka mid ka ah ee ay aad dhirtu uga sii yaraanayso waxa ka mid ah:

(b) Waqooyi galbeed, Togdheer, Boosaaso;

(t) Xamar, Kismaayo, Bakool;

(j) Togdheer, Garoowe, Jowhar;

(x) Marka, Waqooyi Galbeed, Baydhaba.

9) Dhibaatooyinka ka yimaada dhir la'aanta waxa ka mid ah:

(b) Dhulka oo nabaad guura;

(t) Fatahanka oo bata;

(j) Robabka oo yaraada;

(x) b, t, j ayaa sax ah.

10) Marka aynu ka hadlayno dhirta dhaqaalabeeda ma waxa aynu u jeednaa:

(b) Dhirta yaan weligeedba la goyn;

(t) Dhirta tii wax lagu qabsanayo mooyee yaan ta kale la goyn;

(j) Isla inta laga gooyo in le'eg amaba ka badan ha la beero.

11) Dhibaatooyinka ciidda gaadha badanaaba saddex wax ayey ka yimaadaan:

(b) Beeritaanka, daaqa xoolaha, iyo carro guurka;

(t) Daaqa xoolaha, socodka dadka, daar la dhiso;

(j) Beeritaanka, carro guurka iyo gaadiidka ku dul soda.

12) Beeritaanku ciidda wanaaggeeda:

(b) Wax buu u kordhiyaa;

(t) Wax buu yeelaa;

(j) Waxna ma yeelo waxna uma kordhiyo.

13) Daaqa meel kasta ka baxa:

(b) Waxu ku xidhan yahay meesha ciideeda iyo cimiladeeda:

(t) Meesha roobka hela iyo xoolaha ku nool;

(j) Meesha macdanta laga helo iyo beeraha ka samaysan;

(x) b iyo j waa sax.



14) Daaqu dalka Soomaaliya sannadba sannadka ka danbaysa ayey:

(b) Wax u kordhaan;

(t) Wax ka dhacaan;

(j) waxna uma kordhaan waxna kama dhacaan.

**2) Meesha hadalka ku hor qorani uu run yahay «R» ku qor meesha aanu run ahaynna «B» ku qor:**

1) — Degaanku waxu u qaybsamaa mid dabiici ah iyo mid ay dadku ku kordhiyeen.

2) — Degaanka dabiiciga ah waxa ka mid ah daaqa, dhirta, ciidda, iyo dhismaha.

3) — Dadku degaanka wuu ka maarmin karaa.

4) — Sannadba sannada ka danbaysa ayey dadka adduunyada ku nool tiradoodu sii badanaysaa

5) — Inkasta oo dadku degaanka aad ugu baahan yahay hadana waxyaabo xun ayey mararka qaarkood kula kacaan.

6) — Dadku kas iyo kas li'iba way u dhibaateeyaan degaanka.

7) — Xumaanshaha ay waddanada qaarkood hawadu ka soo xumaanayso waxa keenay xoolaha waddamada ku dhaqan.

8) — Hawada oo xumaanaysa waxay werwer ku haysaa waddamada hor u maray.

9) — Dadku degaanka intiisa kale ma dhibaateeyaan hawada oo qudha mooyiye.

10 — Haddii aan degaanka la dhaqaalayn, aakhirka nolosha dadku cidhiidhi ayey gelaysaa.

11) — Baahida uu dadku dhirta u qabo weligeedba wey jirtey.

12) — Dadku dhirta imminka aad uguma baahna ee waayadii hore ayay aad ugu baahnaan jireen.

13) — Waddanka Soomaaliyeed dhul badan oo dhir lahaan jiray ayaa imminka bannaan isu bedelay.

14) — Dhirta waxtarkeeda waxa ka mid ah ciidda wanaagsan oo ay ilaaliso, fatahanka oo ay yarayso roobabka oo dhulka ay ka baxdo ku bata.

15) — Haddii dhirta la dhaqaaleeyo iyo hadii kale toona marna dhirtu waddanka ka dhamaan mayso.

16) — Waxa jira waxyaabo dabiici ah oo aan la'aantood dadku ilbaxnimada heerka uu maanta ka joogo aanu marna ka gaadheen.

17) — Waxyaabaha ciidda wax u tara ee kaaba waxa ka mid ah beeritaanka iyo daaqa xoolaha.

18) — Beeritaanku ciidda lafteeda iyo macdanta ku jirtaba wax buu yeelaa.

19) — Dhirtu ciidda waxba uma tarto.

20) — Dhulalka uu carro guurku ka dhacay waxba lagama qaban karo.

21) — Daaqa meel kasta ka baxa noociisu waxu xidhan yahay kolba meeshu daaqu ka baxayaa cimilada iyo ciidda ay leedahay.


22) — Dhulalka aad u daaqa fiican lihi waa dhulalka adduunyada ugu roobabka badan leh.

23) — Dhirtu biyaha ay u baahan tahay way ka badan yihiin ta daaqu u baahan yahay.



**DALKA SOOMAALIDA**


Dalka Soomaalidu waa dal weeyn oo ku fidsan dhul bedkiisu aanu ka yarayn 1,400,000 km. oo labajibaaran. Waqooyi waxa ka xiga Gacanka Cadmeed, Bari iyo Koonfur-barina waxa ka xiga Badweynta Hindiya. Sidaas aawgeed Soomaaliya waa dalka Afrika ugu xeeb dheer, Koonfur Afrika Mooyee. Soomaaliya waxa Galbeed ka xiga Itoobiya Koonfurna waxa ka xiga Kinya. Dhulka Soomaalida badidiisuna buuro ma laha oo waa dhulhooseed, hase yeeshee meeliba meeshay galbeed ka xigto way ka sii saraysaa. Waqooyiga dalka waxa ku af go'an buuro dheerdheer oo Itoobiya ka yimaada, buurahaas oo xeebta la gudboon. Buurta Soomaaliya ugu joog dheer oo loo yaqaan surad, oo Ceerigaabo u dhowi, buurahaas bay ka mid tahay. Buurtaas joogeedu waa 7900 oo fuudh. Waxa kale oo dhulka Soomaalidu leeyahay dooxooyin ay ka mid yihiin Nugaal iyo Daroor oo buurahaasu ay ku soo biya shubaan, iyagana biyohoodu ay Badweynta Hindiya ku shubmaan.






## QAABKA IYO SAMAYSKA DHULKA

Qaabka dhulka waxa sameeya buuraha bannaanka, doo-xooyinka, xeebaha, biyo rogga, biyo mareenka, biyo qabatinka,



dhirta iyo daaqa. Dalka Soomaalidu wuxuu u badan yahay dhul joogiisu hooseeyo; inkastoo dhul joog-dhexaad ah iyo buuraha uu leeyahay. Qaabka iyo samayska Soomaaliya waxa loo qaybin karaa saddex qaybood.

## I. OOGO:


Dhulku ma laha buuro dhaadheer oo badan, hase yeeshee, buuraha xabashida ee dhaadheer baa waqooyiga dalka ku soo fida. Buurahaasu waxay barbarro la yihiin xeebta Badda Cas ee waqooyiga dalka. Buurahaas oo isku xiriirsani, waxay sameeyaan silsilad gudban dalka waqooyigiisa-galbeed ilaa waqooyigiisa-bari. Silsiladdaas buuraha ah waxa loo yaqaan Golis, jooggooduna wuxuu gaadhaa 2050 m. Buurta Soomaaliya ugu joog dheer oo la yiraahdo Surud, waxay ka mid tahay buurahaas joogeeduna waa 2800 m. Buurahaasi badda way ku dhow yihiin oo xeebtu dhowr tallaabo kama ballaarna xagga bari, inkastoo galbeedka ballaarkeedu uu 60 kilomitir gaaro. Buurahaasi aad bay uga roob badan yihiin xeebta Badda Cas oo loo yaqaan Guban (Guban waxa loogu magacaabay kul badnaan iyo roob yaraan darteed); waxanay ka mid yihiin meelaha dalka oo dhan ugu roob badan.

Inkasta oo buurahaasi roob fiican helaan (400-700mm), geed qabatin ma laha, waayo biyaha roobka buurahaas ku da'a baa qaaday ciidii oo dhigay laagaha biyo-mareenka ah, qaarkeedna badda ku daray. Sidaas darteed, dhinaca xeebta ujeeda ee buurahaas waxa ka muuqda dhagax babac ah oo geedaha sare iyo kuwa hooseba aad ugu yar yihiin. Laagaha iyo biya mareennada xagga xeebta u biyo rogaa, iyagu dhir iyo geed-cawseedba way leeyihiin waayo ciidda fiican ee daadku buuraha ka keeno baa ku joogsata.

Gobollada Sanaag iyo Bari buuruhu way ka dhaadheer yihiin kana dhir iyo daaq yar yihiin kuwa galbeedka ka xigga. Labadaas gobol buurahoodu waxay leeyihiin qarar dhaadheer oo dhagax babac ah. Qararkaasu dhibaato weyn bay u keenaan dadka, xoolaha iyo gaadiidka u kala socda xeebtaas iyo dalka kale. Hase yeeshee, buurahaas waxa ka baxa dhirta dhaqaalaha dalka qayb weyn ka ciyaarta ee laga helo beeyada iyo fooxa.



Guud ahaan buuraha silsiladda Golis, waxa lagu arki karaa carro iyo nabaad guur ay keeneen biyaha ka rogmadaa; dhirta iyo geed-cawseedkuna way ku yar yihiin, sidaas darteed-



geed daran la yiraahdo oo xoolaha aad ugu fiican baa Nugaal ka dhigay meel degmadu joogto ku tahay oo xooluhu si fiican ugu dhaqan yihiin.

Nugaal iyo Daroor roobka ku da'aa ma badna (100 - 200 mm.), hase yeeshee waxa kolkol soo gaara daad ka yimaada Buuraha Golis oo dooxooyinkaas ku soo biyo roga. Labada dooxo waxay ku kala geddisan yihiin, Nugaal waxa ku dhacay carro-guur ka weyn kan Daroor ku dhacay. Taas waxa dhaliyey iyada oo Daroor dabaylaha xoogga leh ee carrada qaada ay ka dugsiyaan buuraha Golis oo aan ka fogeen dooxada, ciidda daadku buuraha ka keenaanna ay joosato halkaas. Hase yeeshee Nugaal buuruhu way ka durugsan yihiin oo dabaylaha jiilaalka ee buuraha soo dul mara iyo kuwa xagaaga ee ka yimaada koonfur-galbeed baa dooxada toos ugu dhaca oo ciidda qaada. Sidaas dareed baa Nugaal dhagax dedib ah iyo dibir jaan ah (carro dheggan) mooyee carradii kore oo dhammi ay ka guurtey. Dibirkaas jaanka ah waxa keli ah oo ka baxa dhir ay ka mid yihiin higlo, daran, caday, berde, qalaanqal, iyo qurac iyo caws gaaban oo ay ka mid yihiin dixi iyo sifaar. Daroor iyadu waxay leedahay ciid fiican oo daadad iyo dabaylo ay ka keeneen buuraha; sidaas darteed dhirteedu way ka jaadad badan tahay cawskeeduna wuu ka dheer yahay (gargaro) kan Nugaaleed.

T) **Xeebaha:** Dalka Soomaalidu wuxuu leeyahay xeeb dhererkeeda lagu qiyaasay 3,200 Km. Xeebta Badda Cas badankeeda iyo xeebta waqooyiga Badweynta Hindiya ballarkoodu wuu yar yahay, waayo buuraha dhaadheer ee waqooyiga dalka ku yaal baa badda ku dhow. Hase yeeshee, xeebta Badda Casi waxay u ballaaran tahay dhinaca galbeed ee Saylac u dhow. Saylac waxa Koonfur ka xigga ban bedkiisa lagu qiyaasay 5,200 oo Km. oo laba jibbaaran. Bankaas oo loo yaqaan Ban Geriyaad, ciiddiisu waa buur-ciid midabyo kala geddisan leh oo ay daad iyo dabayli ka keeneen buuraha Golis. Ban Geriyaad wuxuu ka siman yahay caws ee dhir dhaadheer ma laha inkasta oo dhinaca xeebta xiga ay ka baxaan dhir ay ka mid yihiin garas, caday, duur, xudhuun iyo dhir kale oo geed-xeebeed ah. Saylac iyo hareeraheeda kolka laga reebo, xeebta u dhaxaysa Berbera iyo Calowla bailaarkeedu wuu yar yahay,



geed-qabatiinna ma laha oo dhirta iyo cawskuba waa ku yar yihiin; meelaha qaarkoodse geed-abaareed geed-qodxeed u badan baa ka baxa. Xeebtaas waxa ku badan buuro ka samaysmay shacaabi (dhagax badeed) uu bacaad ama bataax dabayli keentay. Waxa kale oo xeebtaas ku badan laago yaryar oo buuraha ka biyo keena, ciid fiicanna leh oo xooluhu daaq ka helaan. Hobyo iyo ka Koonfur, xeebtu way ka ballaaran tahay tan waqooyi: ciiddeeduna waxay u badan tahay buur-ciid ama bacaad. Buur-ciiddaas oo xeebta barbar kooda waxa ka hooseeya oo ay kor saaran tahay taallooyin ka samaysan dhagax badeed; Qaarkoodna (sida kuwa u dhexeeya Marka iyo Baraawe) weli way guurguuraan geed qabatiinna ma laha, joogoodu-na wuxuu gaaraa 60 mitir. Hase yeeshee, buur-ciiddeedyada qaarkood, siiba kuwa ku yaal dhulka Cadale ka Koonfureeya ee roobka fiican helaa, waxay u badan yihiin kuwa deggan oo dhir iyo daaq fiicanba leh. Xeebtaasi waxay leedahay ciid fiican oo ay keeneen fatahanka webiyada, beerahana way ku fiican tahay.

Meelaha qaarkood oo xeebta ka mid ah, buur ciidaha baa joojiya biyaha badda ku socda. Meelaha sidaas oo kale ah waxa ka samaysma dhul biyuhu fadhiistaan oo dhul-dhoshoq ah. Taas waxa lagu arki karaa Lughaya oo xeebta Badda Cas ku taal iyo dhulka u dhexeeya lambar konton iyo Buufow oo gobolka Shabeellada Hoose ah. Dhul-dhosh-oqu wuxuu ka dhashaa dhulka isku siman, joogiisuna hooseeyo oo jidka biyo rogeenkana wax is-hortaagaan. Dhulka caynkaas ahi haddii laga shaqeeyo wuxuu noqon karaa dhul beeraha aad ugu fiican, waayo wuxuu leeyahay ciido qalaad oo biyo keeneen.

Webiyada haddii dhul adag oo dhagax ahi ka hor yimaado, jidkooda waxay u beddelaan meel ka jilicsan kii hore. Waxa la rumaysan yahay labada webi ee Juba iyo Shabeelle inay jidkooda dhawr goor baddeleen oo ay meelo kala geddisan mareen waayadii hore. Ciidda jaadadka badan ah ee webiyadu meelaha badan isaga keeneen baa dooxooyinka ka dhigtay dhulka dalka oo dhan beeraha ugu fiican.

J) Gobolka saddexaad waa jiidda koonfur ka xigta magaalooyinka Beledweyne - Doolow - Afmadow, Waqooyina ka xigta buur ciideedyada xeebta la gudboon ee xiriirsan Cadale ilaa Raas Kiyambooni. Jiiddaasu waxay ka kooban tahay doo-

biya beeraha waxay ka maarmayaan sugidda roobka, waxana isbedelaya habkii wax loo fali jiray, waxana la soo saarikarayaa tacab intii hore ka badan.

Waraabiskaas waxa uun lagu heli karaa laba siyaabood oo ah, ta hore in dhulka hoostiisa biyo laga helo, iyo meel lagu qabto biyaha roobka ee hoos u daga ama badda ku darsamaya. Haatan biyaha lagu isticmaalo warshaduhu way ku yar yihiin. Dalkeenna. Hase ahaatee waxa la rumaysan yahay biya yaridu in ay u keeneyso dhibaato weys horukaca warshadaha.

## LABADA WEBI.

Xilliga Gu'ga (Abril) meelaha beeraha lihi waxay helaan roob. Roobabka ay helaana wey kala geddisan yihiin, wuxuna u dhexeeya 45 mm, oo Beled-weyn ay hesho iyo 150 mm oo jawhar, 20 mm oo Jamaame ah iyo 150 mm. Balcad, Xilliga Deyrta ah (Nofembar). Sannaddii webiga shabeelle wuxuu keenaa 1,700,000 mitir oo seddex jibaaran oo **biya ah.**

Webiga Jubana wuxuu keenaa laabanlaabkiis kan' Shabeelle. Intaas oo biyo ihina waxa ay waraabin karayaan 80'000 oo hektar oo muus ah; lacagta muuskaas laga heli karaana waa So. Sh. 1,890,000,000.

In si habboon loo isticmaalo dhulka ku habboon beeridda waxa hortaagan biyo la'aanta. Dhulka waxa loo qaybiyaa saddex qaybood.


Saddexdaas waxa ay yihiin:

1. Dhulka roobku uu biyeeyo.
2. Dhulka biyaha aanay cidina ugu tala gelin ay waraabiyaan.
3. Dhulka biyo loogu talagalay ay waraabiyaan.

Badiba waxa la beeraa waxa ay ka helaan biyahooda roobka, iyo waraabis aan aad loogu kalsoonaan karin.

Beeraha wixii ka soo baxa ee dibadaha loo diro waxa ay biyahooda ka helaan waraabiska laga waraabiyo labada webi.





## BADAHA WAAWEEYN

Barashada Badaha waaweyn, Biyaha ku jira badda, iyo dhaqdhaqaaqyada baddu ay sameeyso waxa lagu magacaabaa cilmigii Barashada Badaha.

Barashadaas iyada ahi waa mid aynu aad ugu baahi qabno, maxa yeelay waxa aynu ka hella badda faa'iidooyin aad u tirabadan, oo inagu kalifaya in aynu aad fiiro dheer ugu lahaano, manaafacaadka ku jira badda, inagoo isla markaasna kordhinaayana aqoonta aynu u leenahay badaha, si aqoontaasi iyo hantidaa badduba ay wax inoogala qabtaan baahida bani'aadanka ka haysata xagga dhaqaalaha, warshadaha, siiba xaga cuntada, iyo horumarinta cilmiga Sayniska ah.


Faa'iidooyinkaas waxa ka mid ah :

1. Dunida aynu ku noolnahay 71% baa biyo ah.
2. Baduhu waxay wax u dhimmaan ama ay wax u taran hawada dhulku hel,o oo ka abuuranta dabaylaha ku soo dhacaya badda korkeeda, iyo socdaalka biyaha baddu ay sameeyaan.
3. Biyaha badda waxan ka hella cunto.
4. Meelaha qaarkood mawjadaha baddu waxay dhaliyaan quwad dhalisa dab dhaqaajiya warshadaha
5. Baduhu waxay yihiin jid aynu ganacsigeenna marsano ama mid aynu marno.

## AFARTA BADWEEYN WAXAY YIHIIN:

1. Badweeynta Atlantiga
2. » Basifiga
3. » Hindiya
4. » Arktiga






## HABKA SAMEYSKA BADAHA WAAWEYN


1. Gobolka ugu horreeyaa wuxu ka soo bilaabmaa dhulka korkiisa wuxuuna soo gallaa bada geeskeega.
2. Kan labaadna wuxu ka bilaabmaa halka uu kaasu ku dhammado, wuxuuna u degaa hoos.
3. Gobolka saddexaadna wuxu ka bilaabma meeshuu kan labaad isku taago, waxaana la yiraahdaa Banaanka dheer ee badda.
4. Kan ugu dambeeyaa oo ah kan afaraadna waa muuqaalka sameeya taag dheer oo ka soo baxa badda salkeega. Dhulka bedkiisu waa 197 malyuun oo mayl oo labajibbaaran oo ay 10 malyuun oo labajibaarani yihiin badaha yar yari 130 mayl oo kalena yihiin badaha waaweyn.

**Layli III:**

1) Magacaw badaha waaweyn ee adduunka.
2) Baddu maxay tartaa?
3) Hadday magaaladaadu deked leedahay soo daawo, ka dibna ka sheekee waxaad aragtid.
4) Weligaa kalluun ma cuntay? Bal dhadhami kolkaad heli karto, sidee baa kalluunka loo dabtaa?

## BADDA IYO KALLUUNKA

Soomaaliya waxay leedahay xeeb dhererkeedu gaaro 3,2000 Km; dalkuna wuxuu ku yaal labada kulaale dhexdoo-






da, dhul-badhuhuna wuu ka gudbaa sidaa darteed hawada iyo heer kulka baddu waa kuwo kalluun badan oo kala geddisani ku noolaan karo. Ragga kalluunka aqoonta fiican u lihi waxay ku qiyaaseen kaydka kalluunka Badweynta Hindiya 10 malyuun oo tan.

Sidaa darteed waxa la rumaysan yahay Soomaaliya inuu ku jiro kayd kalluun oo dadka Soomaaliyeed ka haqab beeli karo, debeddana loo dhoofin karo oo lacag badan laga heli karo. Waxa la sheegay in sannadkii 200,000 oo tan oo kalluun ah badda Soomalida laga soo saari karo. Hase yeeshee qalab la'aan iyo aqoon darri aanay dadka Soomaaliyeed aqoon fiican u lahayn kalluunmaysiga darteed, baa kalluunka hadda badda laga soo saaro lagu qiyaasay 5-7 kun oo tan sannadkii.

Laanta Qaramada Midoobey ugu qaybsan cuntada ee loo yaqaan «F.A.O.» war-bixintii ugu dambeysey ee ay soo saareen waxay ku sheegeen in cuntada dunidu (siiba hiliku) yaraanayso, tirada dadkuna kordhayso. Waxa kale oo la ogaadey kalluunku inuu badaha adduunka ka yaraanayo waayo ilaa waqti fog baa aad looga kalluumaysanayey, sidaas darteed waxa la gudboon dalalka badahooda weli kalluunku ku badan yahay ee Soomaaliya ka mid tahay inay ka faa'iidaystaan kaydkooda.

Waxa jira dhaqanka Soomaalida inuu kalluunmaysiga ku yaraa, waayo: (b) dadka Soomaaliyeed waaxy ka haqab la'aayeen hilibka iyo caanaha xoolahooda, sidaas darteed ma jirin baahi ku kallifta inay badda cunto kala soo baxaan. Taasi waxay dhalisay in sayladda kalluunka ee dalka gudihiisu yaraato dadkuna ku dhiiran waayaan inay dheefsadaan kaydka kalluunka. Waxa kale oo jiray dawladihii shisheeyaha ahaa ee dalka u talin jirey iyo kuwii Soomaaliyeed ee ka dambeeyeyba inaanay xil iska saarin sidii kalluunkaas faraha badan ee badda ku jira loo dheefsan lahaa. (t) Dadka Soomaaliyeed ma lahayn aqoon iyo awood ay ku samaystaan qalabka lagu kalluumaysto ee ay ka mid yihiin dabinnada kala geddisan iyo doonyuhu. Samaynta dabinnada iyo doonyaha iyo sida loogu shaqeystaa, waxay u baahan yihiin aqoon iyo barasho gaar ahaaneed; taasna dadku may helin.

Inkasta oo wax kalluumaysato lagu magacaabay ay dalka ka dhisnayeen ilaa 1957-kii, hadana waxba lagama dheefin. Shaqada kalluumaysigu qiimo kuma lahayn Soomaaliya, sidaas darteed baan loogu samayn wakaalad ama wasaarad shaqadaas u gaar ah.

Dawladda Kacaanku tallaabooyin cadcad bay qaaday sidii hore loogu marin lahaa shaqada badda iyo sidii loo dheefsan lahaa kaydka faraha badan ee kalluunka. 1972-kii Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka Jaalle Siyaad, wuxuu dadka Soomaaliyeed ugu baaqay inay u soo jeestaan baddooda kalana soo baxaan cuntada ku jirta. Si taasi ku suurowdo 1973-kii waxa la sameeyey Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadiidka Badda. Isla sannadkaa 1973-ka, waxa la bilaabay in meelo kalluunka, lagu keydiyo laguna gado laga dhiso magaalooyinka Muqdisho, Cadale, Seylac, Hurdiya, Qandala, Caluula, Berbera, Baraawe, iyo Kismaayo.

## JAADADKA IYO MAGACYADA KALLUUNKA BADAHEENNA KU JIRA:

1) Taraaqad
2) Tagadin
3) Afka-toob
4) Seen-Seemana
5) Gadiir
6) Qarriib
7) Fool-xun
8) Qafish
9) Qardabo
10) Balagoo
11) Guduudo
12) Bacoore
13) Baaq
14) Kutunbuul
15) Silqo
16) Seeraafi
17) Xalwaayo
18) Bogleh
19) Afku-libaaxle
20) Kayax
21) Kudar
22) Diire
23) Baroole
24) Socoobaan
25) Seynuub
26) Raqa-Raqo
27) Gabaar
28) Goodi-Moolee
29) Ilka-adag
30) Shoox
31) Ceydi
32) Gabaaraale
33) Aalay
34) Suumaan



Dawladdu iskaashaatooyinkaas waxay ugu ballan qaaday gargar ka kooban: Lacag ay ku samaystaan qalabka lagu kalluumaysto, ka lagu qaboojiyo, iyo meelo lagu gado laguna kaydiyo.

Waxa la ogyahay kalluunku inuu ka mid yahay cuntada ugu nafaqo badan kuwa dadku cuuno, lagama helo waxyaabo lagama maarmaan u ah dhismaha iyo fayoobida jirka. Sidaas darteed waxa loo baahan yahay in dadka Soomaaliyeed ka haqab beelaan kalluunka faraha badan ee baddooda ku kaydsan. Magaalooyinka magacyadoodu hoos ku qoran yihiin oo dhan waxa lagu tala jiraa in iskaashatooyin kalluumaysato laga hirgeliyo sannadka 1973 - 74 - ka: Saylac, Berbera, Mayr, Qandala, Caluula, Baargaal, Hurdiyo, Bender Beyla, Eyl, Garacad, Hobyo, Cadale, Muqdisho, Baraawe, Kismaayo, Juula Jawaay, iyo Raas Kiyambooni. Hadda waxa jira 4 warshadood oo kalluun kuna kala yaal Laas-Qoray, Boolimoog, Xaabo, iyo Caluula, hase yeeshee, waxa lagu tala jiraa in kuwaasna la ballaariyo kuwo kalena la dhiso.

**L a y l i:**

1) (b) Weligaa kalluun ma cuntay?

(t) Haddaanad cunin, waayo?

(2) (b) Ma jeceshahay cunidda kalluunka?

(3) Maxaa ka mid ah qalabka lagu kalluumaysto?

(4) Maxaa dunidda hiilibku uga sii yaraanayaa?

(5) Maxaa noocyo kalluun oo badan baddeenna loogu heli karaa?

6) Maxaa waagii hore kalluumaysigu ugu yaraa Soomaaliya?

7. Soo daawo beer u dhow magaaladaada ama tuuladaada. Xaggee bay biyo ka heshaa ?

8. Meeqa webi bay Soomaaliya leedahay ? Magacaw ? Maxayse taraan ?

9. Kee baad ugu jeceshahay: gallay, haruur, digir, muus iyo mafafaay ? Xaggee bay ka baxaan ?

10. Meeqa goor baad biyo cabtaa ama ku mayrataa maalintii ? Xaggee baad biyahaas ka heshaa ?

11. Magacaw 2da dekedood ee Soomaaliya ugu waaweyn. Midba maxaa laga dhoofshaa ?



## GANACSIGA

Tuulada ama magaalada aad ku nooshahay ku wareeg oo daawo, dukaamada. U fiirso alaabta dukaamada taal iyo waxay dadku ka iibsanayaan. Waxa kale oo aad tagtaa sayladda tuulada ama magaalada, taas oo aad ku arki kartid waxyaabaha baadiyaha laga keeno oo ay ka mid yihiin xoolaha nool, hargaha, subagga, caanaha, dhuxusha, xaabada, cawska iyo wiwii la mid ah. Waxyaabaha ganacsigu ka kooban yahay badan kooda, (kan gudaha iyo kan dibada) waxaad ku arki kartaa labadaas meelood.

1) **Ganacsiga Gudaha:** Ganacsiga dalka gudihiisa waxa maamula oo isku dubarida Wasaaradda Ganacsiga Gudaha iyo Wakaaladaheeda oo ay ka mid yihiin Wakaaladda Ganacmaamulaoo isku dubaridda Wasaaradda Ganacsiga Gudaha siga Ummadda, Wakaaladda Batroolka Ummadda, Wakaaladda Batroolka Soomaaliyeed, iyo Wakaaladda Alaabta Dhismaha. Wasaaradaas iyo Wakaaladaheedu waxay ka shaqeeyaan soo dejinta, qaybinta, iyo sicir u gooyinta waxyaabaha dibada laga keeno oo ay ka mid yihiin cuntada, alaabta dhismaha iyo batroolku. Waxa kale oo Wasaaradda iyo Wakaaladaheedu ay maamulaan tacab-beereedka dalka ka baxa; kuwaas oo ay ka mid yihiin galleyda, haruurka, digirta iyo sisinta. Alaabtaas tacab-beereedka ah, Wasaaraddu iyadaa dalka gudihiisa u qaybisa sicirkana u goysa. Wakaaladda Ganacsiga Ummaddu waxay xafiisyo ku leedahay gobolada, deg-mooyinka iyo tuulooyinka dalka. Xafiisyadaasu waxay dadka u qaybiyaan cuntada — tan debedda laga keeno iyo tan dalka gudihiisa ka baxdaba. Sidaas oo kale baa Wakaaladaha Batroolku ay xafiisyo hawshooda u maamula ku leeyihiin gobolada iyo degmooyinka dalka oo dhan.

2) **Wasaaradda Ganacsiga Dibedda.** Wasaaradda iyo Wakaaladaheedu waxay maamulaan wixii dalalka debadda laugu habboon ee waxyaabaha debadda looga baahan yahay laga ga soo iibsanayo iyo wixii loo iibgeynayo. Wasaaradda shaqadeeda waxa ka mid ah (b) inay raadiso oo doorto meelaha ugu haboon ee waxyaala debbedda looga baahan yahay looga soo gadanayo; (t) inay raadiso oo doorto sayladaha ugu haboon ee loo iibgaynayo waxyaabaha dalku soo saaro.

(j) inay lacagta dalka ka ilaaliso in sharci darro debedda loogu saaro.

Wasaaradu waxay leedahay xafiisyo la xiriira danjirayaasha dalka debedda u jira, kuwaas oo fududeeya sidii Wasaaradu hawsheeda u fulin lahayd. Wasaaraddu waxay ka qaybgashaa Carwooyinka caalamiga ah ee lagu qabto dalal badan oo debadda ah iyo Soomaaliyaba. Carwooyinkaas dal waliba wuxuu soo bandhigaa alaabta uu rabo inuu dalalka kale ka iibsho; wuxuuna ka doortaa tan uu isna u baahan yahay ee dalalka kale lagu sameeyo. Wasaaraddu heshiisyo ganacsi bay la samaysataa dalalka kale ee adduunka, waxanay isku daydaa siday Soomaaliya xiriir ganacsi oo fiican ula yeelan lahayd dunida kale. Hoos waxa ku qoran alaabta dalka debedda uga timaada kuwa ugu waaweyn iyo dalalka ay ka yimaadaan:

| **Magaca Alaabta** | **Magaca dalka ay ka timaaddo** |
|---|---|
| Dhar iyo kabo | Talyaaniga, Shiine, Jabaan, Iglan, |
| Bariis | Shiine, Barma |
| Baasto | Talyaaniga |
| Baabuur | Talyaaniga, Ruush, Jarmal iyo Jabaan |
| Batrool | Ruush |
| Alaabta dhimsaha | Talyaani, |
| Dawooyinka | Talyaani, Shiine, Ruush Jarmal. |

Waxa la filayaa in dalku ka maarmi doono waxyaabo badan oo hadda debedda uga yimaada. Waxa lagu tala jiraa in cuntada hada debedda laga keeno ee ay ka mid yihiin baastada iyo bariisku si degdeg ah loo joojiyo oo dalka gudihiisa laga soo saaro, waayo waxa la ogaaday labaduba inay si fiican dalka uga bixi karaan. Waxa kale oo la filayaa waqti aan fogeyn in la balaariyo warshadaha dharka iyo kabaha ee hadda jira si looga maarmo dharka iyo kabaha hadda debedda laga keeno.



Waxyaabaha debedda loo iibgeeyo dalkana lacag badani ka soo gasho waxa ugu badan xoolaha nool, mooska, hargaha iyo saamaha. Xoolaha nool waxa loo dhoofiyaa dalalka Carabta ay ka mid yihiin Masar, Sacuudi Caraabiya, iyo Kuweyd. Hargaha iyo saamaha waxa loo dhoofiya dalalka Talyaaniga iyo Ingiriiska, Mooskana badankiisa waxa loo diraa Itaaliya. Inkasta oo la filayo sayladiisu inay dhowaan balaaran doonto hadana waxoogaa baa loo dhoofiyaa Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Jarmalka iyo dalalka Carabta qaarkood.

Ganacsiga dalka gudihiisa waxa xiriiriya baabuur inkasta oo meelaha aan weli jidad fiican lahayn sida baadiyaha, awrta iyo dameeruhu ay wax weyn ka taraan isgaarsiinta ganacsiga dalka gudihiisa.

Ganacsiga u dhexeeya Soomaaliya iyo dalalka kale isaga waxa lagu adeegtaa oo xiriiriya maraakiib iyo dayuurado.

Maraakiibtu waxay dalka keentaa alaabta culus ay ka mid yihiin bariiska, baastada, batroolka, alaabta dhismaha; waxanay ka qaaddaa xoolaha nool, mooska iyo hargaha iyo saamaha. Waxay wax keenaan waxna ka qaadaan dekedaha Berbera, Kismaayo, Marka iyo Muqdisho. Dayuuradaha iyaga waxa loogu adeegtaa alaabta fudud, tan degdeg loogu baahan yahay iyo dadka.

**L a y l i:**

1) (b) Magacaw saddex wax oo cuntadaadu u badan tahay?
   (t) Seddexdaas wax ma debeddaa laga keenaa mise dalkaa laga soo saaraa?

2) Maxaa ugu waaweyn hawlaha Wasaaradda Ganacsiga Debedda?

3) (b) Kiilo bariisa iyo kiilo galley ah keebaa qaalisan?
   (t) Waayo?

4) Maxaa ugu waaweyn waxyaabaha Soomaaliya debedda u dhoofiso? Sheeg mid walba dalalka loo iibgeeyo.

5) (b) Ma fiican tahay in laga maarmo dharka iyo kabaha debedda laga keeno?
   (t) Waayo? (j) Sidee baa looga maarmi karaa?

## SHAQOOYINKA DADWEYNUHU QABTO

Waayadii hore ee taariikhda badani'aadanku bilaabantay, dabiicadu aad ayey uga gacan sareeysey ninka, sidaa darteedna u may suurtogal ahayn inuu dego, nolol fiicanna ka samaysto meelaha aan sidoodaba barwaaqada ahayn.

Dadku ma wada degi jirin, bulshooyinkan maanta dadweynaha adduunku u qaybsan yahayna ma jiri jirin. Dadku sida xayawaanka kale ayaa isaga oon qofna qof ka war hayn uu duurka meel ka geli jiray. Dadkaas kartidoodu ma badnayn awoodna may lahayn ay ku degaan dhulka oomanaha ah ama dhulka aan beeraha lahayn. Sidaas darteed dadku adduunyada uguma baahsanayn sida ay maanta ugu baahsan yihiin ee waxay ku noolaan jireen dhulalka barwaaqada ah ee ku dhow biyaha. Waayadaa hore ee aynu ka sheekeynayno dadku shaqada ay qabtaan ee ay ka soo saari jireen waxay ku nool yihiin waxa ay ahayd ugaadhsi iyo arahsi.

Haddii aynu taariikhda bani'aadanka dib u raacno, waxa aynu ogaanaynaa in nolosha bani'aadanku ay marxalado badan ka soo gudubtay oo waaba waaga ka danbeeya dadku qalabka uu haystay iyo fikradiisuba isbedelayeen. Markii kasta ee isbedelkaasu dhacana isla markaa nolosha dadkuna way isla bedelaysay. Heerkaas uu dadku sida xayawaanka u noolaa, heerka labaad uu uga gudbay wuxuu ahaa iyaga oo bartay sida xoolaha loo dhaqdo iyo sida beeraha loo fasho. Isla waqtigaa ay dadku nolosha heerkaa ka gaadheen ayey bilaabeen inay koox koox u degaan oo bulshooyinkii ugu horeeyey samaystaan. Markii ay bulshooyinku samaysmeenna dadku alaabtii uu u baahnaa intii hore way ka badatay, sidaa darteedna dadkii markii hore ugaadhsiga ku noolaa ee uu mid kasta dantiisa u shaqaysan jiray ayaa intay shaqooyinkii kala qaybiyeen qof kastaaba shaqo u go'ay.

Waqtigaa ay bulshooyinku samaysmeen ayaa waxa baaba'ay dhaqankii dadka qof kastaa waxuu u baahan yahay isagu samaysan jiray isaga oon cidna ula ciirsan. Dhaqankaana waxa bedelay mid uu qofku shaqo keliyuun qabanayo dabeetana ku bedelanayo shaqooyinka kale uu u baahan yahay. Marka aynu isu wada geyno waxyaabaha aynu casharka xagiisa



hore ku soo aragnay oo dhan, waxa aynu kala baxaynaa in waagi ilbaxnimadu sii korodhoba alaabta dadku haystaana sii kordhaysey isla markaana shaqooyinka ay qabanayeen sii fidayeen.

Waqtigan aynu joogno wadamada ay adduunyadu ka kooban tahay waxay u qaybsamaan laba qaybood oo waaweyn. Labada qaybood ta hore waa wadamada hore u maray ee ilbaxnimada ka gaadhay heer sare waxaana ka mid ah Jabaan Ruush, Galbeedka Yurub, iwm. Qolada labaadna waa wadamada soo koraya ee Soomaaliya ka mid tahay.

Wadammadaa soo koraya dadka ku nooli shaqooyinka ay qabtaan waxay badanaaba ku xidhan tahay hadba dalka ay ku nool yihiin sida ay dabiicadiisu tahay. Wadamada horumaray dadka intiisa badani waxay ka shaqeeyaan warshado. Sidaas darteed sida dalalka soo koraya, shaqooyinka dadku qabtaa si cadaan ah uguma xirna dalka dabiicadiisa.

Soomaaliya waxay ka mid tahay dalalka soo koraya ee aynu nidhi dadka shaqadiisu waxay ku xidhan tahay dabiicada dalka. Dadka Soomaaliyeed intooda badani waa dad aan deganayn oo xoololay ah. Sababta dadka intiisa badani u tahay xoola raacatadana waxa weeye: Dalka Soomaaliyeed oo aan sannada oo dhan roob ka di'in ee gugii iyo dayrtii oo qudha roob hello. Robabka helaana ma aha roobab aad u badan ee dalka intiisa badan waxa hela roobab dhex dhexaad ah. Dalka laba webi oo qudha ayaa dhexmara, sidaa darteed dalku waxa uu u badan yahay dhul daaq fiican leh oo xoolaha lagu dhaqan karo.

Shaqada labeysa xoolaha dhaqashada ee iyana dad badan oo Soomaali ahi ku nool yihiin waxa weeye beeraha. Dalka Soomaaliya 8 malyuun oo hektar ayaa wax laga beeri karaa.

Todoba iyo badh malyuun oo hektar oo dhulka wax laga beeri karo ka mid ahi waa agagaarka labada webi (Shabeelle iyo Juba) oo sannada oo dhan ayaa wax laga beeri karaa. Nus malyuunka hektar ee soo hadhayna waa dhulalka roobabku ku badan yihiin ee sannadiiba labada jeer ee roobabku jiraan wax laga beeri karo.

Waxa intaa raaca dalku waxu ka imd yahay dalalka adduunyada kuwa ugu xeebta dheer leh wallowse taasu jirto hadana iminka, dad aad u tiro yar ayaa kalluumaysato ah. Sababtu waxa weeye dalka Soomaaliyeed hilibka xoolaha ayey ka door bidaan hilibka kalluunka, sidaa darteed ayaan dad badani kalluunka uga shaqayn. Iyada oo taasu jirto ayaa iminka dadka iyo dawladda Soomaaliyeedba ay ogaadeen in kalluuka looga baahan yahay suuqaqa debedda, sidaa darteedna aad ayaa iminka loogu dhiiriyaa in dad badan oo Soomaali ihi ay kalluunka ka shaqaystaan. Tallaabooyinka laga qaaday si arrintaa loo hirgeliyana waxa ka mid ah warshada kalluunka ee Laas Qoray laga dhisay.

Dadka Soomaaliyeed qaybtaa aynu ka soo hadalaynay mooyiye intooda kale waa dad magaalooyinka ku nool oo ka shaqaysta shaqooyinka kala geddisan ee laamaha kala jaadka ah ee dawladda. Ama waa dad iyagu iskood u shaqaysta sida ganacsatada ama farsamo yaqaanada ay ka mid yihiin dadka daraha dhisa, dadka bircunka ah, iwm. Intaa waxa raaca dadka qabta shaqada adeegista ah.

Halkaas waxa ka muuqda dadka Soomaaliyeed inaanay heerkii koobaad (xoolo dhaqashada) ee ilbaxnimada adduunku soo martay wax badan ka gudbin. Waxse jira xoolo dhaqashada lafteedu inay horumar leedahay, haddii si fiican loo maamulo. Xooluhuna hadda dunidda qiimo weyn bay ku leeyihiin waayo baahidii loo qabay baa maalin walba sii badanaysa.

**L a y l i:**

**Goobaabin geli xarafka ku ag yaal hadalka saxa ah:**

1) Waayadii taariikhda bani'aadanku bilaabatay:

(b) Qofku waxyaabaha uu u baahan oo dhan wuu haystay;

(j) Qofku ma fekeri jirin;

(j) Qofku waxu dabiicada iskaga celiyo ma lahayn.



2) Dadka waqtigan nooli dadkii hore waa:

(b) Ka tiro badan yihiin;

(t) Ka caqli badan yihiin;

(j) Adduunyada waa kaga baahsan yihiin kana karti roon.

3) Intii aanay bulshooyinku samaysmin:

(b) Dadka noloshiisu xoolaha waxba kama duwannayn;

(t) Dadku nolol fiican ayuu ku noolaa;

(j) Dadku waagaas ayuu ka raaxa badnaa sida uu iminka yahay.

4) Wadamada soo koreya:

(1) Iminka warshado ma laha weligoodna lagama samayn karo.

(2) Iminka warshado badan ma leh laakiin waa laga samayn karaa;

(3) Aad ayey u warshado badan yihiin sidaa darteed, dhaqaalahoodu aad ayuu u sareeyaa.

5) Dalka Soomaaliyeed:

(b) Siddeed malyuun oo hektar ayaa wax laga beeri karaa;

(t) Giddigii waa lawada beeri karaa;

(j) Waxba lagama beeri karo.

**Meesha hadalka ku hor qorani uu run yahay «R» ku qor, meesha aanu run ahaynna «B» ku qor:**

1) — Waaba waaga ka danbeeya ayey dadku hore u sii marayaan.

2) — Weligood bulshooyinku waa jiri jireen.

3) — Shaqooyinkan uu dadku qaybsanayo waxa la bartay markii ay bulshooyinku samaysmeen.

4) — Xoolo dhaqashadu ma aha wax liita ama badownimo ah sida dadka qaarkii u haystaan ee waa wax dhaqaale fiican la gaarsiin kara haddii si fiican looga shaqeeyo.

5) — Dalalka soo koraaya dabiicada iyo shaqooyinka dadku qabtaan way isku xidhan yihiin.

**Ka qor ugu yaraan shan shan xariiq su'aalahan hoos ku yaal:**

1) Taariikhda bani'aadanku siday ku soo bilaabatay iyo siday maanta tahay?

2) Shaqaalaha Soomaaliya siday u kala baxaan iyo siyaabaha ay u nool yihiin?

3) Waxyaabaha aad u malaynaysid inay dalalka soo koraya iyo kuwa horumaray ku kala duwan yihiin?